

Somaliland Biodiversity Foundation

Sebtembar 2024—Warsidaha 10

In this issue

Ereyada tifaftirka	1
Cayayaan intee leeg baa Soomaalilaan leedahay?.....	2
Barashada GBIF.....	3
iNaturalist	4
Laabka waxbarista.....	5
Hordhac ku saabsan dhirta badhtamaha Somaliland.....	6
Waxkabaro ururinta Arthropod-ka.....	7
Wararka kale ee ururka	8

Noolaha Tirsigan

Prosopocera marmorata

(Geesoole)



Sawirka Mark Spicer ee [Geesooluhu](#) wuxu si fiican u muujinayaa dahaadhkiisa iyo ateenoooyinkiisa dhaadheer ee uu 'Geesoole' kula baxay. Ugxanta wuxu dhigtaa jirridaha dhirta.

Warsidahan waxa ku jira dhawr maqaal oo ku saabsan cayayaanka. Sababtuna waxa ay tahay waa abuur meel walba laga helo, guryaha, carrada, xayawaanka kale iyo dhirtaba. Qaarkood waa dhiblaaweyaal kuwa kalena waa sharwadayaal. Sidoo kale waa qayb muhiim ah oo ka mid ah nidaamka deegaanka haddii ay tahay furfurka carrada, si hawada iyo biyuhu u dhex geli karaan, nafaqo u rogidda noolaha dhintay iyo faxlidda ubaxyada. Kuwa kalena waxa ay gudbiyaan xanuunnada waxana ay si xun u cunaan xubnaha dhirta, jirrid iyo caleenba.

Dhibaataada ay qaarkood keenaan awgeed, waxa jira danayn xad dhaaf ah oo la xidhiidha cayayaan-dilaha, kimikooyin dilaya cayayaanka, laakiin imika waxa la isla gartay in hoos loo dhigo kimikooyinkaas. Ma aha dhanka kharashka oo qudha, laakiin isticmaalkeeda joogtada ah wuxu sababaa in ay qudhoodu la qabsadaan. Sidoo kale cayayaan-diluhu halkii uu ku koobnaan lahaa nooc gaar ah waxa dhacda in uu waxyeelleeyo noocyo badan. Beryahan cilmibaadhistu waxa ay diiradda saaraysaa qaabka ugu habboonaa ee loo xakameeyo cayayaanka. Dhuuxidda kala gedisnaantooda iyo hab-jidheedkoodu waa tallaabo muhiim ah oo arrimaha lagaga gun gaadhi karo.

Gabagabada warsidahan waxa aad ugu tagaysaa hawlo badan oo la qabtay wixii ka danbeeyey warsidihii hore. Hawlahaa waxa ka mid ah samaynta website cusub oo lagu soo daray bog lagu codsanayo 'mutaddawaciiin'. Fadlan nagu biiri wixii aanu codsanno hadba sidii aad uga qayb geli karto.

Mary E. Barkworth

Marka uu dillaaco caydigu wuxu dhex galaa dhuuxa oo uu khasaare badan gaadhsiiyo. Geesoolayaasha kalena inta badan waa isku dookh. Urta waxa ay u isticmaalaan si ay u helaan hoygooda saxda ah.

Dunida waxa jira ~35,000 oo nooc oo Geesoole, laakiin bahda *Prosopocera* keliya waa 350 nooc oo lagu og yahay Afrikada saxaraha ka hooseysa.

Tiro cayayaan oo intee leeg ayey Soomaalilaan leedahay?


Mary E. Barkworth

Jawaabta oo koobani waa cidna garan mayso. In badan baa cayayaan laga guray Soomaalilaan laakiin aqoonsiga noocyadooda ayaa adag. Waxa jira sidoo kale il xogeed muhiim ah, oo ah degel fududeeya helidda xogta kala geddistaanta noolaha dunida oo ah [GBIF](#).

Waa degel aad ka heleyso goobta noolaha laga diiwaangeliyey ee dunida. Xogtaas oo ay la socoto goorta la qaaday, goobta laga qaaday iyo cidda qaadday. Maanta, GBIF waxay haysaa xogta 3 bilyan oo diiwaan-noole. Ma xuma marka loo eego urur la aasaasay 2001-dii!

Nasiibdarro, 527 diiwaan oo qudha ayay GBIF ka haysay cayayaanka Soomaalilaan Sep 21. Google Scholar-ka iyo iNaturalist ayaa iyaguna wax kooban ku darsaday. Laakiin haba koobnaato e waxa ay wax uun ka sheegaysaa kalageddisnaanta cayayaanka Soomaalilaan.

Isticmaalka jaantuska kala sarreeya ee abla'ablayntu wuxu fududeeyaa diiwaangelinta noolaha. Wuxu noolayaasha u habeeyaa sida ay u kala ballaadhan yihiin. *Species*-ku waa halka ugu hooseysa, *domain*-kuna waa halka ugu sarraysa. Cayayaanku waxa ay noqdaan *Class*, oo ah koox dhexe oo familyga ka sarraysa, kana hooseysa *Phylum*-ka.



Maxaa laga baran karaa 527 diiwaan ee GBIF laga helo ee Soomaalilaan? Cayayaanku waa *Class*, *Insecta*, oo ah ka ugu ballaadhan 22-ka *class* ee *phylum*-ka *Arthropoda*. Diiwaannada Soomaalilaan waxa ay metelaan 222 nooc oo cayayaan ah. Waa tiro aad uga yar tirada laga filayey aaggaas oo ah 1,130. Waxa ay qasbaysaa in tiro kale laga raadiyo Soomaalilaan.


Diiwannada GBIF ee Soomaalilaan, waxa ku jira 7 ka mid ah 29 *Order* ee Cayayaanka oo kala ah *Lepidoptera* (Balanbaalisaha), *Coleoptera* (Tusbaallaha),

Diptera (Dukhsiga), *Hymenoptera* (Shinnida, xoonka iyo qudhaanjada), *Odonata* (Duburlaxa), *Orthoptera* (Kabajaaga), and *Mantodea* (Macooyada).



Sawirrada cayayaanka Soomaalilaan lagu og yahay. Safka 1-aad (*Bidix illaa midig*) *Lepidoptera*, *Coleoptera*, *Diptera*, *Hymenoptera*. Safka 2-aad. *Orthoptera*, *Odonata*, *Mantodea*. (sawirro laga keenay Wikipedia; *Coleoptera* SBF)

Waxa soo jiidasho leh sida tiradaa kooban ee noocyada *Soomaalilaan* ay dhanka kale u meteleyso *Order* kasta oo dunida ku filiqsan. Jaantuskan hoose qurub kastaa wuxu u taagan yahay tirada *order* kasta laga hayo, si farqiga loo muujiyo.




Farqigu ma cad yahay mise keliya waa natiijada xoogaa muunado ah? shaki la'aan waa tiro aad u yar oo muunado ah.

In la kobciyo aqoonta loo leeyahay cayayaanka Soomaalilaan waa muhiim waayo waa qayb muhiima oo ka mid ah wada'oolka (ecosystem). Shaqooyin badan bay qabtaan sida faxlidda, carro nadiifinta iyo samaynta marinnada hawada iyo biyaha ee carrada.

Wax-ka-ogow GBIF: Xayawaanka, Dhirta iyo Fangaska Somali-land

Mary E. Barkworth

Markii aan ka arkay GBIF kalageddisnaanta cayaayaanka Soomaalilaan, waxa aan uga gudbay noolayaal kale. Khariidaddu waxa ay i tustay dhammaan diiwaannada GBIF iyo xogtooda dhigaha iyo loolka ee xayawaanka, dhirta iyo fangaska.



Muuujinta noolayaasha kala duwan ee GBIF. keliya waxa muuqda kuwa leh xogta dhigaha iyo loolka.

Tirada dhammaan diiwanadu (kuwa leh iyo kuwa aan lahayn xogta dhigaha iyo loolku) waxa ay si cad u muujinayaan farqiga metelaadda. Waxa jira 11,236 (82%) oo xayawaan ah, 2,442 (18%) oo dhir ah, iyo 10 (0.8%) oo fangas ah. Saamiga diiwaankani ay noolayaashani kala leeyihiin wuu ka duwan yahay marka loo eego diiwaanka dunida: xayawaanku waa 1,500,000 (19%), dhirta 280,000 (4%), fangaska 6,000,000 (77%). Waa maxay farqigu? Laga yaabaa dhirtu in ay tahay mid si fudud loo arki karo, loo guri karo, loona garan karo.

DIIWAANKA XAYAWAANKA

Marka la eego 11,236-ka diiwaan ee xayawaanka, 10,094 ka mid ahi (90%) waa 'Lafdhabarley' ay 8,918 ka mid ahi (79%) shinbiro yihiin, badnaantaas shimbiraha oo marka loo eego lafdhabarleyda kale (14%) caadi ka ah dunida oo idil.

Tira badnaanta shimbiraha waxa lagu macnayn karaa iyada oo ay in la arko fududahay iyo muuqaalkooda iyo qaab duulistooda awgeed in noocyadooda judhaba la garan karo.

Waxa sidoo kale jira degello gaar u ah aqoonsigooda iyo diiwaangelintooda. Dad badan oo kalena hiwaayad bay u tahay shinbiro daawashadu.

DIIWAANKA DHIRTA

Inta badan 2,442 diiwaan-dhireed waa dhirta nudaha leh. 2364 oo ka mid ah ama 97% waa dhirta ubaxa leh. Saamigan marka la barbardhigo ka dunida waa is yeelanayaan oo intaas bay kala badan yihiin.

Hal diiwaan oo aan ka mid ahayn dhirta nudaha leh waa nooca la yidhaa *Splachnobryum aquaticum* oo ka mid ah bryophytes-ka. Marka aad eegto goobaha biyaha leh waxa aad arki noocyo badan oo bryophytes ah. Aad ugu firso!




Splachnobryum aquaticum in Oman
Sawirka waxa iska leh Carl Rothfels).

DIIWAANKA FANGASKA


Tirada diiwaanka fangaska Soomaalilaan ma badna marka la barbardhigo tirada diiwaanka dhirta iyo xayawaanka. Keliya waa 10 ma aha 22, waayo diiwaanku wuxu sheegayaa in 12 ka mid ah aanay Soomaalilaan ka iman, waxa loola xidhiidhiyeyna waxa ay ahayd markii hore oo dhigaha iyo loolku ay khariidadda halkaa ku beegmeen.

Tani waxa ay i xasuusisay muhiimadda habsiimada xogta qof siiyo GBIF iyo habsiimada xogta lagala dego GBIF. Habsiimadan oo kale waxa la yidhaa **XOG-NADIIFIN**. Waa hab aad u muhiim ah. Waxan dib u eegay dhammaan tirada boggan iyo boggii hore ku qoran markii aan xasuustay muhiimadda xog nadiifinta! qaar baa u baahday in aan beddelo. Farqigu wuu yaraa laakiin haddana qaar baa u baahnaa in la beddelo.

Il-xogeed oo u fiican dadka daneeya dabeecadda.



Sawirro Somaliland ah oo ku jira iNaturalist. "Research grade" waxa loola jeedaa saddex qof baa isku raacay aqoonsigiisa.



Sawir Somaliland ah oo laga soo xigtay iNaturalist.

Ma haysaa sawir qurxoon oo noole oo aad jecleyd in aad dunida la wadaagtid? **U dir iNaturalist!**

Ma doonaysaa in aad ogaato magac noole? sawir fiican ka qaad oo **U dir iNaturalist!**

Ma doonaysaa in aad eegto sawirro ay dad kale ka qaadeen Soomaalilaan ama dacallada kale ee dunida? **Booqo iNaturalist!**

Ma doonaysaa in aad wax ku darto xogta fiiqisanaanta noole. Sawir ka qaad oo **U dir iNaturalist!**

Ma doonaysaa in aad qayb ka noqoto xogaha kala gaddisnaanta noolaha dunida? **Ku biir iNaturalist!**

iNaturalist waa degel il-xogeed bilaash ah oo loogu talagalay in lagu dardargeliyo iskaashiga dabeecadyahannada, nooc kasta oo noole ee ay doorbidayaan. Habka loogu biirayaa waa mid fudud si sawirro loogu diro oo xog looga codsado ama xog loogu caawiyo.

Sawirrada waa in ay weheliso xogta dhigaha iyo loolka goobta noolaha lagu arkay, inkasta oo **iNaturalist** uu xogtaas ka akhriyi karo sawrika moobilka isaga oo adeegsanaya agabkiisa qaab online (toos) ah.

Haddii aad rabto magaca noole aad inyar ka

taqaan, tusaale ahaan, shinbir ku taagan geed-ubaxeed, waxa ay taasi soo jeedin kartaa dareenka xeeldheerayaasha aqoontaas ku hawlan ee golaha oo dhamaantood ah mutaddawiciin.

Tixgelin sii tayada sawirradaada, sidoo kale dhinacyo kala duwan ka sawir xubnaha noolaha, taas oo sahlaya aqoonsiga noolaha. Kuna talagal in adiga oo xitaa sawirro fiican qaaday in ay mararka qaar suurtoobi waydo in la aqoonsado noolihii. Laakiin xiisaha iyo iskudaygu waa muhiim

Mary E. Barkworth



Wararka Ururka

Kuraas iyo Miisaan la Dhigay Shaybaadhka Jaamacadda



Deeq ka timid [54Thrones](#) iyo ururka ayaa qol cusub oo Jaamacadda Hargeysa ah u beddeshay fasal shaybaadhka lagu baran karo, taas oo ardayda u saamaxaysa in ay ku baadhaan muunadaha, iskubarbardhigaan, kuna dhagaystaan casharrada. Casriyeyntan oo ay dhinac socoto horumarka kale ee dhanka casharrada manhajka dhiirrigelinaya falgalku, wuxu ardayga ka caawinayaa in ay bartaan 'waxqabad' halkii ay markii hore dhegeysiga uun ku koobnaayeen.

Xilliga aan shaybaadh loo isticmaalayn qolkaas waxa looga faaidaysan karaa in ardaydu u isticmaalaan goob ay ku horumariyaan aqoontooda kale, sida baadhista cayayaanka Soomaalilaan iyaga oo iskuxidhaya xogta iNaturalist iyo midda muunadaha laga soo ururiyey jaamacadda isla markaana kordhinaya muunadaha xarunta kalageddisnaanta noolaha.



Markii hore

Dacar kale oo cusub oo la daahfuray

Bishii March, Axmed I. Cawaale, Faysal J. Geelle iyo Kennedy Matheka waxa ay si rasmi ah u daabaceen dacar cusub oo uu Kayse Cali markii hore ku soo jeediyey dareenka Axmed I. Cawaale waayo waxay ula muuqatay jaad cusub. Markii si qoto dheer loo darsayna Axmed, Faysal iyo Kennedy waxa ay isku raaceen in ay tahay jaad cusub oo ka duwan kuwii hore loo qeexay. Waxay ugu wanqaleen magaca *Aloe kaysei* iyaga oo ugu magacdaray Kayse Cali, ninkii markii hore arkay in ay jaad gooni ah tahay. Tani waxa ay noqonaysaa, illaa imika inta aynu og nahay, warqad-cilmiyeedkii ugu horreeyey ee dhanka abla'ablaynta ee ay gebi ahaanba dadka qoray kasoojeedaan Geeska Afrika iyaga oo ku sharfaya qof Somalilander ah. Xigashada rasmiga ah ee magacu waa *Aloe kaysei Awale, Gelle & Matheka*. Warqadduna waa:

Awale, A.I., F.G. Gelle, and K. Matheka (2024) A new species of *Aloe* (Asphodelaceae) from *Acacia* "woodlands of hardship" in Adadley District, Somaliland. *Cactus World* 42: 11-17.

Buuggii Hore oo Dib Loo Daabacay

Waxa la soo saaray daabacaddii labaad ee buuggii hore ee *Introduction to Plants in Central Somaliland*. Daabacaddan labaad, si ka duwan tii hore, waxa la iskugu keenay labadii luqadood. Waxa sidoo kale lagu soo daray sawirro badan, xog cusub, qaladdo hore oo la saxay iyo jaldi kii hore ka adag. Buugga waxa ku jira 150 geed oo dhammaan sawirradooda laga qaaday badhtamaha Somaliland, inkasta oo qaar badan oo ka mid ahi dalka intiisa kale iyo dalalka jaarkaba ka baxaan. Buuggu wuxu ku bilaabmayaa guudmar ku saabsan barta ay Somaliland ku taallo, taariikhdeeda, gobolladeeda dabiiciga ah, kaddibna waxa loo gudbayaa liiska dhirta. Geed kasta magaciisa oo saynis ah iyo magaciisa soomaaliga ah baa

Acanthaceae

Barleria argentea Geed Riyood



Very small perennial herb, much grazed by goats. Leaves opposite, green, lance-shaped with entire margins. Flowers trumpet shaped, pale mauve with darker stripes in the throat. Fruit a capsule.

Habitat: Open sandy areas, altitude 100–1500 m
Distribution: Tropical East Africa and Arabia.

Geed hoosaad aad u yar oo gu'yaal jire ah, oo ay aad u jecel yihiin riyuhu. Caleemo iska soo hor jeed u baxay, cagaar ah, oo sida wararka ah, hareerahana ka dhameystiran. Ubax sida tumbada muuqiga u samaysan, soos-ali khafiifa ah, oo xanjimo madaw ku leh dhunta. Miidho ku jira dahaadhi.

Sabo: Dhul burciideed furan, joog ah 100–1500 m.

Filiqsanaan: Kulaalaha Bariga Afrika iyo Carabaha.

Barleria proxima Qodaxtool



Small shrub up to 25 cm with prominent grey spines. Leaves opposite, oval, pale green with entire margins. Flowers bright yellow with four petals above and one smaller below the prominent stamens. Fruit a capsule with a long beak.

Habitat: Stony scrub and along roadsides, up to 1400 m.

Distribution: East Africa to southern Arabia.

Geed gaab yar oo illaa 25 cm ah, oo leh qodro dameeri ah oo soo taagan. Caleemo isasoo eegaya, sida uguanta ah, oo cagaar khafiifa ah, hareerahana ka buuxa. Ubax huruud dhalaalaya ah oo leh Afar laace oo ka sarreeya faxalsidaha taagan iyo mid yar oo ka hooseeya. Miidho gal ku jira oo leh af fiqaan.

Sabo: Kayn dhagax ku badanyahay iyo waddada hareeraheda, joog ah illaa 1400 m.

Filiqsanaan: Bariga Afrika illaa Koonfurta Carabaha.

Introduction to Plants in Central Somaliland

Hordhac ku saabsan dhirta ka baxda badhtamaha Soomaalilaand

SECOND EDITION 2024



Ahmed Ibrahim Awale, Faisal Jama Gelle and Helen Pickering

la xusayaa oo lagu ladhay sifayntiisa iyo meelaha laga helo. Buugga waxa lagu soo gabagabaynayaa tixraacyo, qaamuus iyo tuse ka kooban magacyadiisa sayniska ah iyo kuwa soomaaliga ah iyo sharaxaad ku saabsan sababta magaca saynisku isku beddeli karo ee aanu ka soomaaligu isku beddelin.

Waxad ka gadan kartaa [BRIT Press](#) (dibadda Somaliland) ama [HEMA Books](#) (gudaha Somaliland). Haddii aad goyskaaga ama asxaabtaada u hadyeynaysid waxa fiican qiimaha Somaliland, heshiiska ururka iyo madbacadda ayaa ahaa in qiimaha buuggu ku jabnaado halkaa. Sidaas oo jirta daabacaddaa buuggani marna ma suurooben haddii aanu gacan weyn ka gaysteen shakhsi diiday in la magac-dhabo.



Sida ay 150 geed ugu kala filiqsan yihiin dalalka jaarka

Barashada Arthropods-ka (gaar ahaan cayayaanka)

Bishii Ogos, SBF, Jaamacadda Hargeysa iyo Xarunta hiddo-dhiredka ee Geed Deeble waxa ay si wadajir ah u qabteen tababarkii labaad ee ay bixiso Dr. Tharina Bird oo ka tirsan xarunta qaran ee taariikhda dabiiciga ah ee dalka Koonfur Afrika, tababarkaas oo ku saabsanaa habka loo ururiyo, loo diyaariyo loona kaydiyo Arthropod-ka, oo la siinayey arday ka tirsan jaamacadda Hargeysa. Waxa gacanyareyaal u ahaa laba arday oo iyagu qaatay tababarkii hore ee 2022-kii. Labada tababarba si wacan bay u fuleen. Tharina oo faallo ka bixisay tababarka ka dib ayaa sheegtay in ay aad ugu mabsuudday la kulanka iyo dhexgalka ardayda iyo in labada gacanyare, Nimco Deeq Cabdi iyo Maxamed Cabdi Muuse aan wax loo dhigaa jirin. Waxay sidoo kale u aqoonsatay Yuusuf Xuseen Axmed ardaygii ugu fiicnaa, iyo in CabdiNajib Xuseen Ismaaciil uu noqday ardaygii sameeyey

muunaddii ugu fiicnayd. Ururka SBF wuxu u mahad naqayaa Dr. Bird oo bixisay tababarkan iyo Dr. Lorenzo Prendini oo taageeray.

Sawirradan (hoos illaa kor)

1. Cayayaan raadin
2. Quraarado kala duwan baa lagu ridayaa.
3. Baadhitaan.
4. Intii is lehba khaanad baa lagu wada ridayaa.
5. Shahaado bixin.
6. Soo jeedintii Dr. Bird ee "Muhiimadda ururinta" ee mu-naasabadda.



Wararka kale ee ururka

Koboca kaydka

Xarunta dhiroonku imika waxay gaadhay 813 muunadood oo 573 ka mid ah noocyadooda la aqoonsaday. Xogta xarunta waxa la xigtay 282 goor oo ay xigteen joornaallada heerka sare. Muunada badan waxa la ururiyey sannadkan. Waxa aanu rajaynaynaa in aanu hawlgelinno arday si uu gacan uga geysto diyaarinta kaydka muunadaha oo ah hawl waqti qaadata. Ururintii cayayaanka iyada weli laguma darin degelka OpenZooMuseum. Guga dhaw ayaanu rajaynaynaa in ay taasi qabsoonto.

Web site-ka

Sannadkan waxa aanu heshiis muhiim ah la galnay Firespring oo ah shirkad Maraykanka deggen oo qaabilsan nashaqadaynta iyo maamulista website-yada. [Degelkan](#) wuu ka firfircoon yahay kii hore waanu ka fudud yahay xagga cusboonaysiinta. Waxa kale oo ku jira khaan cusub sida khanka codsiga mutaddawiciinta.

Inkasta oo [degelkan cusub](#) uu imika toos yahay oo uu la URL yahay kii hore, haddana weli hawl baa dhiman. Beddelku wuxu qaataa waqti maxaa yeelay degelkii hore wuxu ka koobnaa bogag badan wuxuna u baahnaa cusboonaysiin culus. Degelka cusub wuxu suuragalinaayaa helitaanka xogo cusub iyo hawlo cusub. Waxa la furay inta aan la dhamayn si loogu daabaco warsidahan.

Ururku wuxu isticmaalaa laba degel oo kale si loo helo xogta noolayaasha Somaliland, [OpenHerbarium](#) iyo [OpenZooMuseum](#). Mid kasta dhawr isbeddel oo aan aad u muuqan baa lagu sameeyey. Waxa ka mid ah in OpenZooMuseum lagu soo daray magacyada

cayayaanka lagu arkay Somaliland iyo dalalka la jaarka ah. Maqaallada boogga 2 iyo 3 ee tirsigan ayaa hawshan lagu xusay.

Is-fidinta ururka

Ururku wuxu isla gartay in uu hawlihiisa ku fidiyo Somaliland sida Jaamacadda Cammuud iyo Jaamacadda Burco, taas oo suuragelin doonta horumar degdeg ah oo dhanka aqoonta kalageddisnaanta noolaha Somaliland la xidhiidha isla markaana abuuri doonta jawigii lagu baran lahaa aqoontaas.

Xubin cusub oo guddida ah

Bishii Ogos, ururku wuxu ansixiyey in guddida sare lagu soo daro Sara Wilkinson-Lamb. Sara waa macallimad dhanka sayniska ka bixisa dugsiyada hoose sidoo kale leh khibrad waxbarashada dadka waaweyn. Waa qof u soo kordhay ururka.

Warkii u danbeeyey

Machadka Rift Valley Institute ayaa ururka siiyey deeq la xidhiidha codsi uu qoray Stephen Johnson oo ciwaankeedu ahaa "**Socdaalkii Swayne iyo waayeelka maanta**". Swayne wuxu ahaa ugaadhsade, wuxu ahaa Kabtan ka tirsan ciidankii Ingiriiska ee Cadan oo Soomaalilaan ugaadhsi u iman jiray. Wuxu qoray buugga *Seventeen Trips Through Somaliland. A Record of Exploration & Big Game Shooting from 1885 to 1893* oo iskugu jira qoraallo, sawirro, sawir-gacmeeddo iyo khariidado ku saabsan safarkiisa. Mashruucu wuxu is barbardhigi doonaa xaaladda goobihii uu xilligaa Swayne maray iyo ta maanta iyo sababaha farqiga keenay. Stephen ayaa codsiga diyaariyey hawshana hagi doona. Faysal Jaamac (SBF) iyo Ismaaciil Xayir, oo ka socda Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada (MoECC) ayaa samayn doona xog ururinta oo Stephen kala hawlgeli doona diyaarinta warbixinta.